Casharka 32

1. Kaddib markii Ilaah Fircoon iyo ciidammadiisii ku burburiyey Badda Cas, halkee buu Ilaah ku hoggaamiyey reer binu Israa'iil?
-Lama-degaanka.

2. Waa maxay lama-degaan?
-Lama-degaan waa dhul halkaasoo bacadku ku badan yahay.

3. Marka Ilaah reer binu Israa'iil ku hoggaaminayey lama-degaanka, maxay reer binu Israa'iil sameeyeen?
-Reer binu Israa'iil waxay eedeeyeen Muuse iyo Haaruun.

4. Waa maxay asbaabta reer binu Israa'iil ay u eedeeyeen Muuse iyo Haaruun?
-Waayo cunno ma ayan haysan.

5. Maxaa sabab u ahaa in reer binu Israa'iil ay cunno waayaan?
-Waayo cunno laguma arko dhulka lama-degaanka ah.

6. Miyaa Muuse awood u lahaa in reer binu Israa'iil cunno ku siiyo lama-degaanka?
-Maya.

7. Miyaa reer binu Israa'iil awood u lahaayeen inay cunno ka raadsadaan lama-degaanka?
-Maya.

8. Waa kuma kan Kleiya ee awooday inuu reer binu Israa'iil cunno ka siiyo lama-degaanka?
-



9. Maxaa Ilaah dadka u caawiyaa xitaa haddaanay rumaysnayn?
-Waayo Ilaah wuxuu abuuray dadka dunida ood han.
-Waayo Ilaah wuxuu jecel yahay dadka ood han.
-Waayo Ilaah wuxuu doonayaa in dadka oodhan ay isaga rumaystaan.

10. Haddii aynaan haddaba Ilaah rumaysnayn, miyaa Ilaah ina badbaadinayaa?
-Maya.

11. Muxuu ahaa hilibkii Ilaah siiyey reer binu Israa'iil habeen habeennada ka mid ah?
-Digaagduur.

12. Maxaa reer binu Israa'iil ugu yeereen kibista Ilaah ka soo diray samada subax hore?
-Manna.

13. Maxaa Ilaah u sheegay Muuse inuu yeelo si dadku biyo u helaan?
-Ilaah baa Muuse ku amray inuu dhagax cidlada yaalla wax ku dhufto.

14. Waa kuma kan Keliya ee inaga badbaadin kara awoodda dembiga, dhimashada iyo Shayddaanka?
-Waa Ilaah oo keliya.

15. Miyaa Ilaah reer binu Israa'iil ku badbaadiyey dariiqooda? Ama go'aannadooda?

16. Sidee baa Ilaah ku badbaadiyey reer binu Israa'iil?
-Wuxuu ku badbaadiyey dariiqiisa ama hannaankiisa uu kaasoo

Ilaah goostay.

17. Sidee baa Ilaah dadka oo dhan u badbaadinayaa?
-Waxaa dadka oo dhan lagu badbaadinayaa hannaan Ilaah goostay ama dejistay.

-Aawaye Muuse iyo reer binu Israa'iil?

-Waxay joogeen lama-degaanka.

-Ilaah horey buu hoggaamintii dadkiisa u sii ambaqaadayaa.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 19:1

1-Markii reer binu Israa'iil Masar ka soo bexeen dabadeed, bishii saddexaad, ayay isla maalintaas yimaadeen cidlada Siinay la yidhaahdo.

-Yaa go'aanka hoggaaminta reer binu Israa'iil iska lahaa?

-Ilaah.

-Maxaa Ilaah u go'aansanayaa halka ay hayaanka u yihiin reer binu Israa'iil?

-Waayo Ilaah oo keliya ayaa garanaya dariiqa wanaagsan ee la aado.

-Isla sida Ilaah kelliya uu u garanayey dariiqa ay marayaan reer binu Israa'iil, ayaa Ilaah si wanaagsan u garanayaa halka dadku ay hayaanka u yihiin ama ku socdaan.



-Kolka xiga halkee buu Ilaah doonayaa inuu reer binu Israa'iil ku hoggaamiyo?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 19:2

2-Oo markay ka soo keceen Refidiim ooa y yimaadeen cidaladii Siinay ayay teendhooyinkoodii cidladii ka dhisteen, oo reer binu Israa'iil halkaasay degeen buurta horteeda.

-Ilaah wuxuu reer binu Israa'iil ku hoggaamiyey Buur Siinay.
-Miyaad xusuusataa Buur Siinay?

-Buur Siinay waa buurta halkaasoo Ilaah Muuse kala hadlay duurka gubanaya.

-Maxaa Ilaah ka ballanqaaday Muuse markii uu Muuse kala hadlay duurka gubanaya?

-Ilaah wuxuu ballan-qaaday inuu Muuse ku soo celin doono Buur Siinay.

-Miyaa Ilaah dhowray ballankiisii ahaa inuu Muuse keeni doono Buur Siinaay?

-Haa.

-Inkastoo Fircoon doonayey inuu dilo Muuse, Ilaah baa haddana Muuse daafacay, oo wuxuu imminka ku soo celinayaa Buur Siinaay.

-Innaguna waynu aamin karnaa ballammada Ilaah ina siiyo waayo Ilaah mar waliba wuu dhowraa Ballammadiisa.

-Markii Muuse iyo reer binu Israa'iil ay yimaadeen Buur Siinay, Ilaah wuxuu Muuse ugu yeeray buurta.

-Maxaa Ilaah Muuse ugu yeeray buurta dusheeda?

-Ilaah wuxuu doonayey inuu Muuse la hadlo.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 19:3-5a

3-Muusena kor buu ugu tegay Ilaah, markaasaa Rabbigu buurta uga yeedhay isagii, oo wuxuu ku yidhi, Yacquub reerkiisa wxad ku tidhaahdaa sidan, reer binu Israa'iina ku dheh.
4-Idinku waad aragteen wixii aan ku sameeyey Masriyiintii, iyo sidii aan idiinku soo qaaday gorgorro baalashood, oo aan idiin soo kaxaystay.
5-Haddaba sidaas daraaddeed, haddaad daacad ahaan ii addeecaysaan, oo aad axdigayga dhaowraysaan, de markaas waxaad ahaan doontaan dad hanti iiga ah daydyowga oo dhan.

-Maxaa Ilaah imminka Muuse ugu yeeray buurta dusheeda?

-Ilaah wuxuu doonayaa inuu reer binu Isra'iil cahdi la dhigto ama la samaysto.

-Muxuu ahaa haddaba xiriirka Ilaah doonayey inuu la samaysto Israa'iil?

-Ilaah wuxuu yiri haddii reer binu Israa'iil ay daacad u noqdaan amarradiisa dabeeto wuu barakadaynayaa.

-Haddii reer binu Israa'iil aanay addeecin amarradiisa oo dhan, maxaa Ilaah samaynayaa?



-Ilaah wuu ciqaabayaa iyaga.

-Muuse wuxuu ka sood egay buurtii si uu reer binu Israa'iil ugu sheego wixii Ilaah yiri.

-Maxay haddaba reer binu Israa'iil ka yiraahdeen wixii Ilaah soo yiri?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 19:7-8

7-Markaasaa Muuse yimid oo wuxuu u yeedhay waaeelladii dadka oo dhan, kolkaasuu erayadii Rabbigu isaga ku amray oo dhan hortooda la wada dhigay.
8-Markaasaa dadkii oodhammu waxay ku wada jawaabeen, oo yidhaahdeen, Kulli waxa Rabbigu ku hadlay ood han waannu wada yeeli doonnaa. Markaasaa Muuse Rabbiga uga warramay erayadii dadka.

-Reer binu Israa'iil waxay Rabbiga ku yidhaahdeen waannu addeecaynaa amarrada Ilaah ina wada siiyey.

-Miyaa haddaba reer binu Israa'iil xusuusteen intii hore ee ay Ilaah ku caasiyoobeen?

-Maya.

-Reer binu Israa'iil waxay illoobeen inaanay rumaysanin in Ilaah awoodo inuu jid uga furo Badda Cas, markii Fircoon iyo ciidammadiisii ay daba joogeen reer binu Israa'iil.

-Reer binu Israa'iil waxay kaloo illoobeen inaanay rumaynin in iyaga Ilaah cidlada ama lama-degaanka cunno iyo biyo ku siin

karo.

-Miyaa haddaba reer binu Israa'iil ay ka fakareen inay awoodeen inay addeecaan awaamiirta Ilaah?

-Haa.

-Maxaa sabab u ah in reer binu Israa'iil ay la noqoto inay awood u leeyihiin inay awaamiirta Rabbiga addeecayaan?

-Waayo wxay ahaayeen dad qab weyn oo kibir oo faan badan.

-Miyaa haddaba reer binu Israa'iil awoodeen inay addeecaan kulli amarradii Rabbiga?

-Maya.

-Maxaa sabab u ahaa in reer binu Israa'iil ay awoodi waayeen inay addeecaan kulli awaamriitii Rabbiga?

-Waayo, waxay ka soo farcameen Aadan iyo Xaawo.
-Waayo waxay ahaayeen kuwo dembi ku dhashay.

-Waayo waxay kaloo ahaayeen kuwo ku dhashay inay u cabiid-sanaadaan Shaydddaanka.

-Dadka oo dhan waxay ka dhasheen Aadan iyo Xaawo.

-Dadka oo dhan waxay ku dhasheen gunnimada dembiga.

-Dadka oo dhan waxay ku dhasheen gunnimada Shayddaanka.



-Miyaa Ilaah garanayaa in reer binu Israa'iil aanay awoodin inay addeecaan Awaamiirtiisa ood han?

-Haa.

-Haddii Ilaah garanayo in in Israa'iil aanay awood u lahayn inay addeecdo awaamiirtiisa, muxuu u doonayaa inay isaga iyo reer binu Israa'iil ay heshiis galaan?

-Miyaad haddaba qof la geli kartaa heshiis marka aad garanayso inaanu awood u lahayn inuu dhowro?

-Maya.

-Haddii Ilaah garanayo in reer binu Israa'iil ayan dhowri karin ama adeeci karin awaamiirtiisa oodhan, maxaa Ilaah u doonayaa inuu heshees la samaysto reer binu Israa'iil?

-Ilaah wuxuu doonayaa inuu iyaga heshiis la dhigto, waayo wuxuu doonayaa inuu reer binu Israa'iil wax baro.

-Maxaa Ilaah doonayaa inuu baro reer binu Israa'iil?

-Wuxuu doonayaa inuu baro reer binu Israa'iil inaannu addeeaynin Awamiirtiisa ood han.

-Weliba haddii reer binu Israa'iil ay aad iyo aad isugu taxluujiyaan inay dhowraan sharciga Rabbiga ma awoodi karaan inay wada dhowraan Sharciga Ilaah.

-Ilaah wuxuu doonayaa markaa inuu reer binu Israa'iil baro inaanay dhowri karin Shrcigiisa oo dhan, waayo iyaga ood han

dembi bay ku dhasheen.

-Ilaah wuxuu doonayaa inuu reer binu Israa'iil baro taas waayo ma ayan awoodin inay addeecaan dhammaan amarradiisa, Ilaah oo keliya ayaa awoodsiiyey iyaga inuu ka samatabbixiyo dhimasho daa'im ah.

-Maaddaama Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen, carruurtooda oodhamina waxay ku wada dhasheen dmebi.

-Maaddaama Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen, carruurtooda oo dhan waxay ku dhasheen dembiyada qalbigooda.

-Maaddaama Aadan iyo Xaawo ay maqleen Shayddaanka, carruurtooda ood han waxay noqdeen carruurta dembiga, dhimashada iyo Shayddaanka.

-Maaddaama Aadan iyo Xaawo ay maqleen Shayddaanka, carruurtoodii oodhan waxay noqdeen addoommada dembiga, dhimashada, iyo Sahyddaanka.

-Ilaah wuxuu mrkaa doonayaa in reer binu Israa'iil uu tuso dmebiyadooda.

-Ilaah wuxuu doonayaa inuu reer binu Israa'iil tuso sharkooda.

-Ilaah wuxuu doonayaa inuu reer binu Isra'aiil tuso inay yihiin addoommada dembiga.

-Ilaah wuxuu doonayaa inuu reer binu Israa'iil tuso inay ahaayeen addoommadii sharka.



-Ilaah wuxuu doonayaa inuu reer binu Israa'iil tuso inay ahaayeen addoommada Shayddaanka.

-Ilaah wuxuu doonayaa inuu tuso reer binu Israa'iil haddaanay Ilaah uga soo qaysahan dembiyadooda, si uu iyaga u badbaadiyo, dabeeto dembiyadooda ayaa iyaga burburinaya.

-Ilaah oo keliya ayaa awoodda dembiga inaga badbaadin kara.

-Ilaah oo keliya ayaa awoodda dhimashada inaga badbaadin kara.

-Ilaah oo keliya ayaa inaga badbaadin kara awoodda shayddaanka.

-Haddaba waa kan cahdigii Ilaah la dhigtay reer binu Israa'iil.

-Haddii reer binu Israa'iil ay wada dhowraan qaynuunnada Rabbiga, waa la barakadaynayaa.

-Haddii Israa'iil aanay wada addeecin amarradiisa ood han, dabeeto Ilaah wuu ciqaabayaa.

-Kaddib markii Muuse u sheegay Ilaah ayaa reer binu Israa'iil aqbaleen inay addeecaan amarrada Ilaah oo dhan, maxaa haddaba Rabbigu leeyahay?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 19:9-11

9-Kolkaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Bal ogow, waxaan kugu iman doonaa daruur qaro weyn dhexdeed, inay dadku maqlaan markii aan kula hadlayo, iyo weliba inay weligood adiga ku rumaystaan.
10-Kolkaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Bal orod oo

dadka u tag, oo maanta iyo berri qoduus ka dhig iyaga, oo dharkooda ha qasaaleen.

11-Oo maalinta sddexaad diyaar ha u noqdeen, waayo, maalinta saddexaad dadka ood han hortiisa ayaa Rabbiga ku soo degi doonaa Buur Siinay.

-Ilaah wuxuu Muuse ku yiri waxaan ku soo dul degayaa Buur Siinaay, markaana waxay ahayd in reer binu Israa'iil ay is-diyaariyaan.

-Maxaa Ilaah u doonayaa inuu buur Siinay ku sood ul dego?

-Ilaah wuxuu doonayaa inuu tuso iyaga inuu Qoduus yahay.

-Ilaah wuxuu kaloo doonayaa inuu reer binu Israa'iil tuso inuu dembiga neceb yahay.

-Ilaah wuxuu doonayaa inuu reer binu Israa'iil u muujiyo inuu dembiga ku ciqaabo dhimasho.

-Ilaah wuxuu kaloo Muuse u sheegay in Buur Sinnaay aan loo sood howaan marka uu ku soo dul-degayo.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 19:12-13

12-Oo waa inaad soohdin dadka kaga wareejisaa, oo waxaad ku tidhaadaa, iska jira, oo buurta ha fuulina, hana taabanina xuduudkeeda; waayo, ku alla kii buurta taabta hubaal waa la dili doonaa.

13-Gacanu yaanay taaban iaga, laakiinse hubaal isaga waa in la dhagxiyo ama waa in gantaal lagu dilo; dad iyo duunyo ha ahaado, kaasu sina yaanu u noolaan; oo markii buunka aad looga



dhawaajiyo, buurta ha soo fuuleen.

-Maxaa Ilaah u doonayaa in Muuse  xuduud u kala sameeyo Buurta?

-Waayo Ilaah ma uusan doonayn in qofi taabto Buur Siinay.

-Waa maxay sababta aanu Ilaah u doonaynin in qofi taabato Buur Siinay?

-Waayo Ilaah wuxuu ku soo dul degayaa Buur Siinaay.

-Maxaa dhacaya haddii reer binu Israa'iil ay taabtaan Buur Siinay?

-Qofkii taabta wuu dhimanayaa.

-Maxaa reer binu Israa'iil u dhimanayaa haddii ay taabtaan Buur Siinaay?

-Waayo Ilaah wuxuu ku soo du degayaa Buurta.

-Waayo isagu waa qoduus.
-Waayo isagu wuxuu neceb yahay dembi oo dhan.

-Waayo Ilaah wuxuu dembi oo dhan ku xukumay dhimasho. Maalintii saddexaad, Ilaah wuxuu ku soo degay Buur Siinay.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 19:16-18

16-Oo maalintii saddexaad, markuu waagii beryay, waxaa dhacay onkod iyo hillaac oo daruur qaro weyn baa buurtii soo dul joogsatay, oo waxaa yeedhay buun codkiisu aad iyo aad u weyn

yahay, kolkaasay dadkii xerada ku jiray oo dhammu wada gariireen.

17-Markaasaa Muuse dakii xeradii ka soo bixiyey inay Ilaah la kulmaan aawadeed; kolkaasay waxay istaageen buurta salkeedii.

18-Oo Buur Siinay dhammaanteed way qiiqaysay, m axaa yeelay, Rabbi baa dusheeda ku sood egay, isagoo dab ku dhex jira, oo qiiqeediina kor buu u baxay sida qiiq foorno oo kale, oo buurtii oo dhammuna aad bay u gariirtay.

-Ilaah wuxuu soo dul istaagay Buur Siinay.
-Onkod ayaa wada gigilay buurta dusheeda.

-Waxaana meel waliba oo buurta ku dhowku dhacayey biriq.

-Waxaa buurtii daboolay gebigeedba qiic.
-Waxaa kaloo laga dhawaajiyey Buun.

-Waxaana si xoog badan u gariiray buurtii.

-Waxaa markaas soo degay Ilaah, iyadoo buurtu ay dab ku dhex jirto.

-Miyaa reer binu Israa'iil baqeen?

-Haa aad bay u baqeen.
\
-Maxay ahaayeen calaamadaha biriqda, onkodka, qiica, iyo dabka?

-Waa in Ilaah qoduus ayahay.



-Waa in Ilaah neceb yahay dembiga oodhan.

-Waana caddayn ah in Ilaah dembiga dhimasho ku canaanto.

-Wakhtigii Nuux, Ilaah wuxuu dembiga ku canaantay dhimashada dadkii dembiileyaasha ahaa.

-Wakhtigii Soddom iyo Gomirrahna, Ilaah wuxuu ku ciqaabay dembiga dhimashada dembiileyaasha.

-Wakhtigii Fircoonna, Ilaah wuxuu dembiga ku canaantay dhimasho.

-Ilaah dembi oo dhan dhimasho ayuu ku ciqaabaa?

-Ilaah wuxuu soo istaagay Buur Siinaay, oo wuxuu Muuse u sheegay inuu buurta soo fuulo.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 19:20-25

20-Markaasaa Rabbigu wuxuu ku soo kor degay Buur Siinay, oow uxuu yimid buurta dusheedii. Kolkaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ugu yeedhay buurta dusheedii; oo Muusena kor buu u baxay.

21-Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Hoos u deg, oo dadka u dig, waaba intaasoo ay Rabbiga xaggiisa u soo xadgudbaan inay fiirsadaan, oo ay qaarkood badanu halligmaane.

22-Oo weliba wadaaddada Rabbiga u soo showaanaya qoduus ha iska dhigeen, waaba intaasoo Rabbigauu halligaaye.

23-Kolkaasaa Muuse wuxuu Rabbiga ku yidhi, Dadku Buur Siinay sooma fuuli karaan, waayo, waxaad nagu amartay, oo nagu tidhi, Buurta soodin ku wareeji, oo qoduus ka dhig.

24-Markaasaa Rabbigu wuxuu isagii ku yidhi, Orod oo hoos u deg, oo dabadeedna soo fuul adigoo Haaruun wata; laakiinse wadaaddada iyo dadku yaanay kor u soo xadgudbin xagga Rabbiga, waaba intaasoo uu halligaaye.

25-Haddaba Muuse hoos buu u degay, oo dadkii u tegey, una sheegay.

-Ilaah wuxuu Muuse u shegay oo ku yiri, haddii reer binu Israa'iila y buurta taabtaan way dhimanayaan.

-Waa maxay asbaabta Ilaah ugu oggolaaday Muuse inuu buurta soo fuulo?

-Miyaa Muuse aanu ka mid ahayn carruurtii Aadan Iyo Xaawo?
-Haa wuu ka mid yahay.

-Miyaa Muuse aanu dembi ku dhalan?
-Haa wuu ku dhashay.

-Waa maxay asbaabta Ilaah Muuse ugu oggolaaday inuu buurta dusheeda yimaado?

-Waayo Muuse Ilaah buu rumaystay.

-Waayo Muuse Ilaah wuxuu ugu yimid dariiqii uu dhigay.
Waayo Muuse wuxuu Ilaah ugu yimid dariiqii Ilaah qudhiisu tusay isaga.

-Ilaah wuxuu doortay Muuse si uu u noqdo farriin walaha Ilaah.

-Ilaah wuxuu doortay Muuse si uu farriinta ugu keeno reer binu Israa'iil.



-Haddii reer binu Israa'iil ay diidaan inay Muue maqlaan, markaa waxay diidayaan inay maqlaan Ilaah.

-Kitaabka Ilaah ee Baybalka, waxaa ku qoran farriin ay leeyihiin dadka ood han.

-Haddii dadku ay diidaan inay dhegaystaan farriinta Rabbiga ee ku qoran kitaabkiisa, Baybalka, dabeeto innaguna waxaynu diidaynaa inaynu maqalno Ilaah.

-Haddii aynu diidno inaynu maqalno Ilaah, Ilaah wuu ina ciqaabayaa weligeen.

-Casharka kan inoogu xiga, waxaannu baran doonaa awaamiirta Rabbiga uu siiyey reer binu Israa'iil iyo weliba dadka dunida oo dhan.